Tafsiya Wa Tarbiyah

Axkaamta Ramadanta

Abu Cabdirahman
Ahmed Abdulqadir Ahmed

Tusmo

HORDHAC 2
ISUGU BUSHAARAYNTA BISHA RAMADAN 2
FADLIGA SOONKA IYO BISHA RAMADAAN 2
AXKAAMTA SOONKA 2
TAARIIKHDA SOONKA LA WAAJIBIYAY 2
U diyaar garawga Bisha Ramadaan 2
YUU KU WAAJIBAY SOONKU 2
ARKAANTA SOONKA 2
WAXYAABAHA SOONKA BURIYA 2
WAX YAABAHA LOO BAAHAN YAHAY IN QOFKA SOOMANI KA TAGO. . 2
MAXAA LA GUDBOON QOFKA SAFARKA KU JIRA (SOCDAALKA): 2
QOFKA BUKA EE XANUUNSANAYA: 2
Gabadha xaydka ama dhiiga umusha qabta: 2
Odayga iyo Islaanta gaboobay: 2
Haweenayda uurka leh iyo ta nuujinaysa: 2
Qofka dhinta iyada oo soom lagu leeyahay: 2
SUXUURTA: 2
IFTAARKA (AFURKA) 2
AL-ICTIKAAF: 2
CIIDDA IYO AXKAAMTEEDA: 2

VOLUME 1 ISSUE 2 RAMADAAN 1430H

HORDHAC

Maqaalka **Tasfiyah wa Tarbiyah** waa maqaal aan ugu tala galnay Bisha Ramadaan, si ay walaalaha Muslimiinta ahi uga faa'idaystaan, una buuxiyo baahidda loo qabo in la helo maqaal islaamiya oo qofka muslimka ah ee Soomaaliyeed akhristo.Waxaanuna gundhig uga dhigi doonaa aqoonta dhabta ah ee qofka muslimka ahi u baahanyahay, iyadoo aan ku salayn doono maqaalkan manhajka saxiixa ah iyo sunada Nabiga (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** Sidoo kale waxaan balan qaadayaa in aan ka fogeeyo wax kasta oo aan markaa daliil saxi ku soo aroorin, waxaanan Ilaahay ka baryayaa in uu ii sahlo camalkan khayriga ah, isla markaana na waafajiyo ikhlaaska iyo camalka suuban.

ISUGU BUSHAARAYNTA BISHA RAMADA

Bisha Ramadaan waa bil qiimo iyo qaayo balaadhan ugu fadhida qofka muslimka ah.Nabiguna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** waxaa ka sugnaatay in uu saxaabada ugu bushaarayn jiray markaay soo fool yeelato bishaasi ugana warami jiray khayraadka iyo fadliga ku sugan. Markaa waxaa looga baahanyahay qof kasta oo muslimi in uu fursadaa ka faaiidaysto ilaahay ku galadaystay oo uu u dhakhsado daacaadka, kana fogaado xumaan oo dhan, kuna dadaalo wixii ilaahay ku faralyeelay haba ugu horayso salaaduye waayo waa tiirka labaad ee islaamka, waana shayga ugu wayn marka laga yimaado qiridda iIlaahay iyo Rasuulkiisa (Ashahaadataynka) markaa waxaa waajib ku ah qof kasta oo muslima(rag iyo haweenba) in ay ilaaliyaan oo oogaan waqtigeeda si khushuuc iyo xasiloonaanba ku jirto.

Hadaba ayadoo bisha ramadaan bilanayso waxaan idiin soo gudbinaynaa maqaal ku salaysan arimaha muhiimka ah ee qofka ay soonku ku waajibtay loo baahan yahay in uu ogaado, iyo sidii uu uga faaiidaysan lahaa fursadaasi qaaliga ah

FADLIGA SOONKA IYO BISHA RAMADAAN

- Bisha Ramadaan waa bishii quraanka la soo dejiyay Ilaahayna (Subxaana wa tacaallaa). isagoo quraankiisa arintaa inoogu sheegaya waxa uu yidhi(**bisha ramadaan waa bishii la soo dejiyay Quraanka, xaal uu yahay hanuun dadka, iyo caddayn hanuunka, iyo kala bixin (xaqa iyo baadilka)**

- Sidoo kale Ilaahay waxa uu quraankiisa soo dejiyay habeen barakaysan (habeenka Qadarka) sida uu ku xusay [Suuratu ad'dukhaan aayada 3].

- Habeenkaas oo ah habeen aad u qiimo badan qofka muslimka ahna la doonayo in uu ku dadaalo baadidoonkiisa si uu u helo khayrka lagu sheegay oo ah inuu ka khayr badan yahay kun bilood.Waana habeen ku dhex jira habeenada tirada kala dhiman ee tobanka u danbeeya Ramadaan. (21,23,25,27,29) Xadiis ay caa'isha ka warisay Rasuulka (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). waxa ay tidhi: **Rasuulku waxa uu ahaa hadii ay soo gasho tobonka habeen (Ramadaan) u danbeeyaa guntiguu adkaysan jiray, habeenkana wuu noolayn jiray, ehelkiisana wuu toosin jiray)[1].**

Sidoo kale waxaa fadli iyo khayraad badan lagu xidhay soonka, oo qofkii soonkiisu waafaqo ikhlaas iyo sunada rasuulka in (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). Uu helayo danbidhaaf, wixii danbiya ee hore uga dhacay ee aan kabaair ahayn, wayo kabaairtu waxay u baahantahay in lala yimaado tawbad keen, wuxuuna rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). Yidhi (**qofkii u sooma bisha ramadaan iimaan iyo ajar dalab waxaa loo dhaafaa danbiyadii hore uga dhacay)[2]**

[1] Waxaa weriyay Bukhaari (224), Muslim Kitaabul Ictikaaf
[2]Waxaa weriyay Bukhaari (1977), Muslim Kitaabul Musaafiriin /173

Xadiis uu warinayo Abu hurayrah waxa uu yidhi: Nabigu (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). **Waxa uu baxay minbarka markaa suu yidhi: Aamiin, aamiin, aamiin. waxaa lagu yidhi Rasuulkii Alloow waxaad ubaxday minbarka oo waxaad tidhi: Amiin, Aamiin, Aamiin? Wuxuu yidhi: waxa ii yimi Jibraa'iil** (Calayhi salaam) **wuxuu yidhi: Ruuxa haleelay Ramadaan ee aan loo denbi dhaafini Ilaahay Naarta ha ku fogeeyo. Ee dheh Aamiin.waxaan idhi: Aamiin[3].**

Hadaba ayadoo aan la soo koobi Karin khayraadka iyo wanaaga bisha Ramadaan ay xanbaarsan tahay waxaanu Ilaahay ka baryaynaa in uu inaga dhigo kuwii hela khayraadkaas bisha Ramadaan.

- **Waxa iyana ka midda fadaa'isha soonka:**

- **Qofka soomani waxa uu leeyahay laba farxadood**: Rasuulkuna **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). waxa uu yidhi(**qofka soomani waxa la kulmaa laba farxadood, ta hore waa markii uu afurayo ,ta danbena waxa uu ku farxi doonaa ajarka soontiisa marka uu la kulmo Rabigiisa[4].**

- Irida janada ee ar- rayaan: Rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam).waxa uu yidhi (waxaa jirta irid ku taal jannada dhexdeeda oo lagu magacaabo arrayaan waxaana geli doona maalinta yaw mulqiyaame dadkii soomi jiray oo qudha, waxaana la odhan doonaa maye ehlu soomkii? Way soo kici doonaan cid aan iyaga ahaynna ma geli doonaan, waana la xidhi doonaa iyaga ka dibna cidi ma geli doonto).[5]

- **Neefta qofka soomani Miskiga ka udgoon**: Rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** waxa uu yidhi:**neefta qofka sooman afkiisa ka soo baxdaa Ilaahay agtiisa ka udgoon miskiga.)[6]**

- **SOONKU WUXUU YAHAY GAASHAAN:**

Wuxuu gaashaan ka yahay macaasidda sida Rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). sheegay (dhalinyarooy kiinii guursan karayaa ha guursaddo isagaa indhaha laabi og xubintana ilaalin og, kii aan kari karina ha soomo waxa uu yahay gaashaan[7].

Wuxuu sidoo kale gaashaan ka yahay naarta Rasuulkuna waxa uu yidhi: Soonku waa gaashaan lagaga gaashaamo qofka Naarta[8]

Waxaa iyana intaa dheer in soonka iyo quraan kuba ay maalinta aakhiro shafeeca qaadi doonaan.
Si doo kale waxaa la furaa iridaha jannada, waxaa la xidhaa albaabada Naarta, shayaadiintana waa la xidhxidhaa oo la katiinadeeyaa.

AXKAAMTA SOONKA

Maxaa looga jeedaa soomka:
X**aga luqada carbeed**: soonku waa in laga caaganaado oo aan lasamayn shay (wax).
Dhanka eray bixinta shareecada islaamku: waxaa soonku yahay in layska dhaafo oo laga caaganaado cabidda, cunidda iyo jimaaca haweenka, inta u dhaxaysa waa dilaaca ilaa inta qoraxdu dhacayso. Iyadoo intaa ay la socdaan waxyaalo sidoodaba shareecadu ay reebtay lakiin si gaara loo sii adkeeyay ka fogaanshahooda bisha ramadaan oo ay axaadiista rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** Sheegtay Sida: laqwiga, hadalka xun, beenta, markhaati beenalaha, xanta iwm.

TAARIIKHDA SOONKA LA WAAJIBIYAY

Soonku waa cibaado soo jireen ah oo ay la iman jireen anbiyadii ilaahay soo diray iyo umadihii inaga horeeyay, lama hayo war sugan oo ka waramaya xiligii ay bilaabantay iyo umadii ugu horaysay ee la timaadda, sidoo kale waxaan iyana la ogayn qaabka ay u soomi jireen iyo maalmaha ay soomi jireen iyo waxyaalaha ay ka soomi jireen.
Waxaase lagu waajibiyay Umadda Nabi maxamed **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** sanadkii 2aad ee hijriyada, Ilaahay (Subxaana wa tacaalaa) kitaabkiisa casiiska waxa uu ku yidhi (**Duulkii Ilaahay rumeeyoow waxaa laydinku faral yeelay soom, sidii loogu faral yeelay kuwii idinka horeeyayba si aad u dhawrsataan.)[9]**

U diyaar garawga Bisha Ramadaan

Waxaa la gudboon Muslimiinta in ay u diyaar garoobaan bisha ramadaan iyagoo u kuur galaya dhalashada bisha markaa waa in ay Bisha shacbaan tiriyaan waayo bishu waxa ay ku dhamaataa 29 cisho ama 30. Markaa hadii ay arkaan bisha waa in ay soomaan, hadii laga daboolana waa in ay shacbaan 30 maalmood buuxiyaan dabadeedna ay soomaan, waayo bishu sodon kama badato. Rasuulkunu **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam).waxa uu yidhi (ku **sooma aragti, kuna afura aragti, hadii laydinka daboolana waa inaydin dhamaystirtaan shacbaan sodonkeeda .) [10]**

[3] Waxaa weriyay Ibnu Khusaymah (3/192), Axmed(2/246), Bayhaqi(4/204), Asalkiisuna wuxuu ku jiraa Saxiix Muslim
[4] Waa Mutafiq calayhi ah (Bukhaari iyo Muslim) min xadiis abu hurayrah
[5] Mutafiq Calayhi (waxaa laga wadaa waxaa wada weriyay Bukhaari iyo Muslim labadooda kitaab ee saxiixa ah.)
[6] Waxaa weriyay Muslim
7 Waxaa weriyay Bukhaari (4/106) , Muslim (1400)
[8] Waxaa weriyay Axmed (3/241)
[9] suuratul-Al-baqrah : 83
[10] Waxaa weriyay Bukhaari (4/106)

Waxaa iyana aan haboonayn in qofku uu soon ka horaysiiyo bisha ramadaan maalin ama laba maalmood, isagoo uga jeeda feejignaan, balse hadii ay waafaqdo soon uu soomi jiray wax dhib ihi kuma jirto. Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). isagoo arinkaa ka waramaya waxa uu yidhi: **ha ka horaysiinina ramadaan soom maalin ama laba, aan ahayn mid qofku soomi jiray, markaa ha soomo**.) [11]

Waxaa iyana layna faray in bisha la raadiyo oo hadii laba qof oo lagu kal soon yahay cadaaladoodu ay ka markhaati kacaan in la soomo, Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam).waxa uu yidhi (…**hadii laba ka markhaati kacaan aragtideeda ku sooma oo ku afura'**.)[1] . Sidoo kale waa la aqbalayaa qofka qudha ka markhaati kiciisa waxaana u daliila in Ibnu cumar bisha u sheegay rasuulka, Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). Dadkii amray in ay soomaan'. [12].

YUU KU WAAJIBAY SOONKU

Soonku wuxuu ku waajibay qofka ay ku kulmaan arimo sadex ah,oo hadii mid kamida la waayo markaa aan soon dusha ka saarayn.

- Waa in uu muslim yahay: qofku haduu Soomo isagoo aan Muslim ahayn waa bar kuma taal. Waayo Ilaahay waxa uu quraankiisa ku yidhi (**waxaanu u qasadnay waxay faleen oo camala waxaanuna ka yeelay boodh la afuufay**.) [Furqaan: aayada 23]. Sidoo kale Ilaahay isagoo ka waramaya munaafiqiintii waxa uu yidhi (waxaa **u diiday in la aqbalo wax bixintooda waa ka gaalowgooda ilaahay iyo rasuulkiisa uun, mana yimaadaan salaada iyaga oo wahsanaya mooyee, mana bixiyaan iyaga oo karaahiyaysanaya mooyee)** [suuratu-Tawbah: aayada 54.]

  Hadiise qofku soo islaamo bisha Ramadaan iyada oo lagu jiro waxaa lagu leeyahay in uu soomo mana soo gudayo ayaamaha dhaafay.

- Waa in uu miyir qabo; waa in soomuhu caqligiisu dhamaystiran yahay oo aanu waalayn, qofka aan miyirka qabina soon laguma leh.

- Waa in uu qaan gaadh yahay; in kastoo fuqahadu ay qaan gaadhnimada ku xadeeyaan 15 sano, hadana sida saxiixa ah qofkii laga helo amaaradaha soo socda waxaa loo ictibaari yaa qaan gaad

  - Hadii ay Mani (shahwad) ka timaado.
  - Hadii timaha hoose ka soo baxaan.
  - Hadii xayd ka yimaado.
  - Ama ay uur qaado.

ARKAANTA SOONKA

- **NIYADDA:**

Niyaddu waxa ay kala saartaa cibaadada iyo caaadada waxaana loo baahanyahay qofku marka uu samaynayo camal cibaado ah in uu la yimaado niyaysi, markaa qofka soomayaa waa in uu niyaystaa in uu soom farala soomayo ka hor intaan waagu dilaacin, hadiise waagu dilaaco isaga oo aan Niyaysan soontiisii waa bar kuma taal. Waxaana daliil u ah xadiiska rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). ku yidhi:
(**Qofkaan soomka faralka ah niyaysan intaan waagu dilaacin lagama aqbalo soon.)** [14]

Niyaddu waxay ka dhacdaa qalbiga, in afka lagaga dhawaaqaanaa waa shay bidca ah iyo khilaafid la khilaafay hadiygii Rasuulka (Salalaahu calayi wa calaa aalihii wasalam). Soonkuna waxa ay kala mid tahay cibaadaadka kale sida salaada.Culimadda muslimiintana xili kasta iyo meel kasta oo ay joogaan waxay ku kulansan yihiin in aan niyadda oo lagu dhawaaqaa aanay sharciga iyo diinta meel kaga sugnayn in Imaam shaafici loo tiiriyaana ay tahay arin ah faham xumo iyo gabood fal ay weheliso jaahilnimo!. Waxaana ku dhaboobaya qawlkii ninkii shaacirka ahaa " **Wakam min caa'ibin qowlin saxiixin aafatuhuu min fahmi al-saqiim"** " badanaa inta hadal saxa ceebaysay dhibaatada haysataana tahay fahamkooda oo buka "

[11] Muslim (mukhtasarka /573)
[12] Waxaa weriyay Nasaa'i (4/132), Axmed(4/321).
[13] Waxaa weriyay Abu Daa'uud (2342)
[14] Waxaa weriyay Abu Daa'uud (2404) , Ibnu Maajah(170), at-Tarmidi(1730), Nasaa'i(2/172), eeg tuxfatul asharaaf (11/172)

Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam) waxa uu yidhi markii uu barayey ninkii salaadiisa xumeeyay (hadaad salaadda u kacdo waysadda dhamaystir, dabadeedna qiblada u jeeso, takbiirso dabadeedna akhri wixii kuu fudud qur'aanka)[1] waxaa uu yidhi **al-qaadi Abu rabiic Sulaymaan ibnu Cumar ash-shaafici:** in niyadda lagu dhawaaqo iyo in imaamka laga daba akhriyaaba sunnada kama mid aha waana makruuh, haddii ay u keento buuq dadka tukanayana waa xaaraam.Qofka yidhaahda niyadda in lagu dhawaaqaa waa sune waa qaldamay, umana banaana isaga iyo qayrkiiba in ay ka hadlaan cilmi la'aan diinta ilaahay.
Imaam Abu Cabdulaah maxamed ibnu qaasim al-Tuunisi al-Maaliki waxaa uu yidhi: "Niyadda waa acmaasha qalbiga in lagu dhawaaqaana waa bidco iyadoo ay intaa dheer tahay buuqa ay ku furto dadka. [16]

- In laga caaganaado oo laga dheeraado dhamaan wixii wax u dhimaya qofka soonkiisa ayadoo laga fogaanayo waxyaalaha buriya soomka .Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). waxa uu xadiis saxiixa ku yidhi(**Ruuxii aan ka tegin beenta iyo ku dhaqankeeda iyo ceebaynta, Ilaahay waxba uguma fila ka tegidda uu ka tegay cuntadiisa iyo sharaabkiisa(soonkiisa**).[17]

WAXYAABAHA SOONKA BURIYA

- In si kasa wax loo cuno waxna loo cabo, wuxuuna ilaahay quraankiisa ku leeyahay:

(**..Cuna oo caba inta uu ka muuqdo liidka cadi (waagu) kan madow aroortii dabadeedna dhamaystira ilaa gabaldhaca....)** [18]

Markaa hadii qofka soomani uu cabo ama cuno wuu afuray waxaana lagu gaar yeelay taas qofkii si kasa (ulakac) u sameeya.
Hadiise ay uga dhacdo isagoo ilawsan ama kama'ah amaba lagu qasbo soonkiisii burimaayo oo wuu u jiraa .

Waxaana si cad u qeexaya xadiis uu Aba hurayra ka weriyay Nabiga **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** oo uu yidhi (**qofkii is ilaawa isagoo sooman oo wax cunna ama cabba waa in uu dhamaystirtaa soomkiisa waayo waa cunno iyo sharaab Alle siiyay.**). [19]

Waxa kale oo Rasuulku **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** yidhi **('Ilaahay waa ka dhaafay umaddayda wixii gef ah ama ilow ama lagu qasbo')**. [20]

Hadayse dhacdo in qofku si kasa oo ula kaca u cabbo ama u cunno waxaa laga rabaa:

1. In uu maalintaa inta ka hadhay afkiisa haystaa oo aanu waxba cunnin waxna cabin.
2. Waa in uu Ilaahay u toobad keenaa, Danbi dhaafna waydiistaa, waayo waa macsi aad u wayn, waa in uu qaleeyaa maalintaa badalkeeda.

- **In si kasa laysaga matajiyo**: qofka Soomani hadii si ula kaca uu isaga matajiyo tusaala ahaan in uu farta afka iska geliyo ama siyaabo kale adeegsado soonkiisii waa burayaa waxaana Rasuulku **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). uu yidhi ' **Qofkii uu soo dhaafo matag (isagoo sooman) qalle(soo celin) laguma laha qofkiise iska matajiya qalle ayaa lagu leeyahay.**

  Markaa hadii qofku uu iska matajiyo waxaa laga rabaa:

  1. Waa inuu afhaystaa maalintaa inta ka hadhay.(Imsaak)
  2. Waa in uu ilaahay u tawbad keenaa.
  3. Waa in uu malintaas soo oo qalleeyo badalkeeda.
- **Dhiiga caadada iyo ummusha**: hadii ay haweenaydu hesho dhiiga caadada ama umusha iyadoo sooman way afuraysaa, haba ahaato maalinta galinkeeda hore ama ka danbeba. Mana banana in haween xaaladaa ku sugani soonto,

[15] Muslim (1/307)
[16] Si aad uga bogato aqoon fiicana ugu yeelato mas'aldan eeg (Saadul-macaad 1/20 , al- ifsaax 1/56 , Majmuucul-fataawa 22/223).
[17] Waxaa weriyay Bukhaari (1903) , Abu Daa'uud (2362)
[18] Suuratul-baqra : 187
[19] Waxaa weriyay Bukhaari (4/135) , Muslim (1155)
[20] Daxaawi (sharx macaani athaar2/56), Xaakim (2/198), Daaraqudni(4/171) sanadkiisuna waa saxiix

Waana in ay soo qallaysaa ayaamahaa ay afurtay. Rasuulkuna **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** Waxa uu yidhi ' **miyaanay haday xayddo ahayn mid aan tukanayn oo aan soomayn? Waxaanu nidhi mayee waa si daa,**

Taasi waa nuqsaanta diinteeda,'Riwaaya kalena waxa uu Rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).**yidhi'[21] **Habeenada ay salad la'aanta tahay Ramadaana ay afuran'tahay baa ah nusqaanta diinteeda.** Shareecaduna waxa ay fartay in ay haweenaydaasi soo qallayso ayaamahaa dhaafay. Mucaadah waxa ay tidhi **Caa'isha ayaan waydiiyay oo aan ku idhi ' waa maxay arinka haweenka xayday ee soonka qalaynaya ee aan Salaaada soo qallaynaynin? Waxay Caa'ishi igu tidhi' ma waxaad tahay Xaruuriyad,[22] Waxaan ku idhi ma ihi xaruuriyad ee waan ku waydiinayaa Markaa Caa'ishi waxa ay tidhi: waanu heli jirnay(caadada) waxaana nala amray in aanu soomta soo qalayno Salaadase nalama amrin in aanu soo celino.**) [23].

- **IRBADAHA LAYSKU NAFAQEEYO**:

Irbaddaha noocani waxa ay buuxiyaan kaalintii Cuntada iyo cabbida wayna buriyaan soonta.
Waxaa kamida: gluucoosta.
Hadii qofku uu isticmaalo irbadahaa waa in uu soo qaleeyaa maalintaa, waxaase haboon hadii u baahan yahay waa in uu habeenkii qaataa.

- **La kulanka ninku xaaskiisa la kulmo (la jimaaco):**

hadii ninku haweenaydiisa la galmoodo maalin ramadaana soontii way ka buraysaa (Culimada qaar baa qaba hadii uu ugu dhaco sikama ah oo ilaabo in uu soomanyahay in uu la xukun yahay sidii qofkii cabay ama cunay isagoo moogan. (Waxaase is waydiin leh siday labada qof ee is qabaa labadooduba u hilmaami karaan?)

Hadii qofku xaaladani ku dhacdo oo uu ficilkaa la yimaado waxaa dushiisa ah in uu la yimaado arimahan soo socda isagoo raacaya sida ay u kala horeeyaan:

1. In uu qoor xoreeyo, hadii uu awoodi kari waayo waa in uu
2. soomaa 2 bilood oo wada socota,hadii uu awoodi waayo
3. Waa in uu 60 miskiin quudiyaa mid walba siiyaa hal mud oo u dhigma (600grm), oo cuntada baladkiisa laga quuto.

Haduuse qofku sadexdaaba awoodi waayo markaa way ka dhacaysaa, waayo takaaliiftu waxa ay ku xidhantahay awoodda. Ilaahayn waxa uu quraanka ku sheegay (**in aan nafna ilaahay ku mashaqayn waxay awoodo mooyaane) [**Al-Baqrah (286).]
Waxa kale oo daliil u ah arinkan xadiiska Abaa hurayrah warinayo' Rasuulka (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). **Waxaa u yimi Nin, waxa uu ku yidhi Rasuulkii Ilaahayoow waan halaagsamay. Rasuulku waxa uu ku yidhi: oo maxaa ku halaagay? Ninkii waxa uu yidhi waxaan ku dhacay xaaskaygii (jimaac) Ramadaan (anoo sooman). Rasuulku waxa uu ku yidhi ma xorayn kartaa qoor? Ninkii wuxuu yidhi maya. Waxa uu ku yidhi 2 bilood oo isku xiga ma soomi kartaa? waxa uu yidhi maya. Waxa uu ku yidhi: 60 miskiin ma quudin kartaa? waxa uu yidhi maya. waxa uu ku yidhi fadhiiso. Wuu fadhiistay. Nabigii** (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). **.waxaa loo keenay Dimbiil (salad) ay ku jirto timir waxa uu ku yidhi sadaqayso. Ninkii waxa uu yidhi' oo ma waxa weeye in aan siiyo cid naga saboolsan? Madiina labadeeda shiil(dhinac) ma degana reer naga saboolsani.** Xadiiska waxaa uu ku sugnaday erayo kala duwan.[24]
Waxaa iyana sida raajixa ah (saxa ah) in aan kafaara gud ku waajibin qofka dumarka ah waayo Rasuulku kuma waajibin qoftii dumarka ahayd ee ninkaasi qabay kafaara gud. ee isaga ayuu u sheegay mid qudha.
Sidoo kale hadii uu ninku xaaskiisa ku qasbo jimaac iyadoo aan raali ka ahayn oo nacaysa arinkaa, iyana laguma leh kafaara gud soonteedina waa saxiix. Ninka ayaa laga rabaa kafaaragudka iyo qadaaga aynu kor ku soo sheegnay.(eeg fataawa siyaam) Sheekh Cabdulcasiis ibnu Baaz, Sheekh ibnu Cuthaymiin, Sheekh Cabdulaah ibn Jibriin iyo Lajnah daa'imah.

- **In Xubinta Qofka ay ka soo baxdo Manidu (Shahwaddu)** si ula kaca (kas)

Hadii qofku si ikhtiyaariya uga soo baxdo sida: taabashada, dhukanshada, lafara ka ciyaarka haweenaydiisa, isagoo sooman maalintii, soonkiisii way ka buraysaa.
Hadayse manidu iskeed u soo baxdo oo aan qofku u sabab noqon soo bixideeda ama isaga oo hurda ay ka timaado soomkiisii waa saxiix oo ka buri mayso.Caa'isha Ilaahay raali ha ka ahaadee waxa ay tidhi: **Rasuulku (**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). **Wuxuu i dhukan jiray isaga oo soomman, wuxuuna laabta igu qaban jiray isaga oo sooman, laakiin waxa uu ahaa kan qudha ee idinku jira ee u hanan og naftiisa, (iska adkayn kara in uu ku dhaco jimaac)**

[21] Muslim
[22] waxaa loogu magac daray tuulo yar oo kuufa (Ciraaq bay ku taalaaye) u jirta 2 mayl waana meeshii ay degeen khawaarijtii ku baxday Cali (radiyallaahu canhu) waxaana loogu yeedhaa xaruuri qof kasta oo xambaarsan ictiqaadkaas.markaa waxay aamin sanaayeen in gabadhu haday xayd leedahay ay salaada soo celiso marka ay daahirto. Caa'ishana waxay ka baqday in uu Mucaadah fikirkaasi galay.
[23] Waxaa weriyay Bukhaari (4/429), Muslim (335)
[24] waxaana soo weriyay Bukhaari, Muslim, Termidi, Baqawi, Abu Daa'uud, Ibnu Maajah

FIIRO: qofku hadii uu gacantiisa isticmaalo oo manidu sidaa kaga timaado waxa uu ku dhacay kabaa'ir (denbi wayn) soonkiina way ka buraysaa kafaara gudkeeduna waa in uu Ilaahay u toobad keena, toobad dhaxal gal ah oo shuruudaheedi u dhanyihiin, waa in uu ku dadaalaa acmaasha wanwanaagsan, waana in uu soo qalleeyaa maalintaa uu soonkiisii buriyay.

WAX YAABAHA LOO BAAHAN YAHAY IN QOFKA SOOMANI KA TAGO.

Ma aha qofku in uu Cuntada iyo Cabbitaanka oo qudha ka tago, balse waxaa loo baahanyahay in uu ka fogaado waxkasta oo soonkiisa wax u dhimaya sida: Beenta, Xanta, Cayda, Afxumida, i.w.m Inkastoo marka horeba laynaga reebay arimahaas oo aanay banaanayn in lala yimaado marnaba, ayaa hadana Bisha Ramadaan laynagu sii adkeeyay, hadii qofku arimahaas aan soo sheegnay uu ku dhacana waxay kala tagaan abaalmarinta iyo ajarkii uu ka heli lahaa soomkiisa waxayna ka soo saaraan sidii qof aan soomin oo kale. Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). Waxa uu xadiis sanadkiisu saxiix yahay ku yidhi **(Badanaa inta ruux sooman aan ka dheefin soomtiisii gaajiyo haraad waxaan ahayn)**[25].
Waxaa loo baahan yahay in qofku ka fogaado waxyaalahaa dhaawacaaya soomtiisa si uu u helo dhawrsanaata Ilaahay sheegay (**duulkii Ilaahay rumeeyoow waxaa laydinku waajibiyay inaad soomtaan, sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horeeyayba si aad u noqotaan kuwa dhawrsada.(suubanayaal).**

- **WAXYAABAHA U BANAAN IN QOFKA SOOMANI SAMEEYO:**

Ilaahay (subxaana wa-tacaalaa) isagaa Ina abuuray ogna wixii wanaag iyo maslaxadiba inoogu jirto, inagana dulqaaday wixii aynaan awoodi karin. **(Wixii ilaahay ina amray waxaa ku jira maslaxa khaalisa (**badhaxtiran**) ama raajixa (**doorbiday**), wixii Ilaahay inaga reebayna waxaa ku jirta mafsado khaalisa ama raajixa**) Hadaba waxaa jira arimo u banaan qofku in uu sameeyo marka uu sooman yahay sida:

1. **Qofka hadii waagu u beryo isaga oo jinaabo qaba**:
   Qofku hadii uu reerkiisa la kulmo oo waagu beryo isaga oo aan qubaysan, niyaystayna in uu soomo soomkiisii waa jiraa oo waa saxiix. Caa'sha iyo umu salama ilaahay raali ha ka ahaadee waxa ay yidhaahdeen: **Nabigu waxaa waagu u dilaaci jiray isagoo jinaabo qaba dabadeedna wuu qubaysan jiray oo soomi jira**y.' Waxaase loo baahan yahay in uu qubaysto intaan cadceedu soo bixin si uu u tukado salaada subax, Ninkase waxaa waajib ku ah in uu xaadiro salaada jamaacada si uu ula tukado.

2. **Cadayashada (rumayga).**
Qofka waxaa u banaan in uu cadaydo maalintii xiliga uu doono inta uu sooman yahay

   Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). wuxuu yidhi (**hadaan ka baqayn in ay umaddaydu ku dhib mudato waxaan amri lahaa salaad kasta iyo waysaysi kasta in ay cadaydaan**.')[26]
3. **Luqluqashada iyo sandaarsiga**: qofka sooman waxaa u banaan luqluqashada iyo sandaarsiga, waxaase loo diiday in uu ku xeel dheeraado waayo waxaa laga yaabaa in biyahaasi dhuuntiisa gaadhaan, Nabiguna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** Waxa uu yidhi: **weysayso wayso dhamaystiran, oo is dhex geli faraha aadna u sandaarso hadaanad soomanayn**.)[27]
4. **Dhunkashada iyo taabashada ooryaha**: waxaa u baanaan ninku in uu xaskiisa dhunkado ama taabto isagoo sooman, Caa'sha Ilaahay raali ha ka ahaadee waxay tidhi: **Rasuulku (** Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). **waxuu ahaa mid haweenkiisa dhunkada, oo salaaxa isagoo sooman, wuxuuna ahaa ka idiinku hanashada badan naftiisa.')** [28]
5. **Istoobidda:** waxay markii hore ka mid ahayd waxyaalaha soonka buriya, balse markii danbe xukunkaa waa la nasakhay, oo waa la baneeyay. Waxaana Nabiga (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). ka sugnaatay in uu is toobay isagoo sooman. Ibnu-Cabaas Ilahaay raali ha ka ahaadee wuxuu yidhi: Nabigu (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**). Wuxuu is toobay isagoo sooman.**')[29]
6. **Dhadhaminta Cuntada:** Cuntada dhadhaminteeda way banaantahay laakiin waxaa shardiya in aanay u gudbun dhuunta, oo aan la liqin. Waxaa Ibnu cabaas laga soo weriyay **(dhibaato kuma sugna hadii la dhadhamiyo khalka ama wax kale hadaanay dhuunta galayn adigoo sooman'**.)[30]
7. **Biyo qaboow in madaxa lagu shubto ama lays marmariyo:** arintani way banaantahay waxana sugan In Rasuulku (salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam): uu madaxiisa ku shubay biyo isagoo sooman kul, ama haraad dartii.)'[31] .
8. Waxa kale oo banaan: Indha kuusha, dawada indhaha, dhegaha, ama sanka lagu dhibciyo, ilkaha oo layska bixiyo, cidiyaha oo layska guro, iyo dhegaha oo la dhukaydo.

MAXAA LA GUDBOON QOFKA Musaafir ka ah (SOCDAALKA):

Qofka musaafirka sida nusuusta ku cad waa la khayaar geliyay (doorasho) in uu soomo iyo in uu iska afuro ayadoo waliba lagu dhiiri geliyay in uu rukhsada qaato. Ilaahay isagoo arinkaa ka waramaya waxa uu yidhi:

[25] Waxaa weriyay Ibnu Maajah (1/539), Daarimi (2/211) Axmed (373), Bayhaqi (4/270)
[26] Bukhaari maca Fatxul Baari (4/158), Ibnu Khusaymah (3/247) , Sharxul-Sunah(6/298)
[27] Termidi (3/146), Abu Daa'uud (2/308) , Ibnu Abi- shaybah (3/101) , sanadkiisuna waa saxiix.
[28] Waa mutafiq calyhi
[29] Bukhaari maca fatxul baari (4/155)
[30] Bukhaari ayaa tacliiq ahaan ku weriyay, Ibnu Abi shayba iyo Baqawina wa xidhiidhiyeen sanadkiisa
[31] Abu Daa'uud (2365), Axmed(5/376)

(Ruuxii buka ama safara waxaa korkiisa ahaaday ayaamo kale (soomkooda) Ilaahay wuxuu idinla doonayaa fudayd ee idinlama rabo culays.) [Albaqra (185).]

Rasuulkuna **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** Isagoo ka waramaya in rukhsadda la qaato waxa uu yidhi **(Ilaahay waxa uu jecelyahay in lala yimaado rukhsadda sida uu u necebyahay in lala yimaaddo macsida**). [32].
Dadkuna way ku kala duwan yihiin Safarka, qofku hadii aanu ku dhib mudanayn soonka, wuu soomi karaa inta uu socdaalka ku jiro, waxaana inagu filan qawlka laga soo weriyay
Abii Saciid al Khudri uu leeyahay **(waxa ay u arkayeen ruuxii awood u leh in uu soomo in ay wanaag santahay in uu soomo, haduuse ku dhib mudanayo waxaa u wanaagsa in uu afuro)**.[33] Markaa hadii safarka qofku dhib kala kulmayo hadii uu soomo waa in uu rukhsada qaataa oo afuraa, sidaasaana wanaaga iyo raali ahaanshaha Ilaahay ku jiraa Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). . Waxa uu yidhi (**Sama falku muu ahaan in la soomo marka safarka lagu jiro**)[34]

QOFKA BUKA EE XANUUNSANAYA:

Qofku hadii bukaankiisu yahay mid aan laga rajo qabin in uu ka bogsado, way ka dhacaysaa soonkii waxaana laga rabaa in uu quudiyo miskiin maalin kasta oo uu afuro, wuxuuna siinaya hal mud oo u dhigma (600g) oo cunta ah, hadba waxa meesha uu joogo laga cuno sid a caadiga ah.Hadiise qofku uu bukoodo xanuun uu ka kacayo waxaa laga rabaa in markii uu raysto uu soo celiyo ayaamihii uu afuray.

Gabadha xaydka ama dhiiga umusha qabta:

Iyada uma banaana in ay soonto, haday soontana kagudimayso, ee waa in ay afurtaa, oo markii ay daahir noqoto ay soo qallaysaa ayaamihii ay afurayd.

FIIRO: Gabadha nifaaska qabta hadii uu dhiigu la dhaafo afartan casho waxa la gudboon in u ictibaariso dhiigaa dhiig faasida, waana in ay waysaysataa oo tukataa, soomtaana.Hadii uu waafaqo xaydkeedu afartanka ka dib oo dhiiga ka socdaa leeyahay calaamadihii xaydka lagu yaqaanay markaa way ka tegay soomtii iyo salaadii.

Odayga iyo Islaanta gaboobay:

Waxaa u banaan hadii aanay soomi Karin in ay afuraan, Ilaahayna waxa uu quraankiisa ku yidhi (**kuwa ku dhib mudan waxa ay quudin miskiin...**) [Al-baqra (183).] Ibnu cabaas oo ayadaa sharxayaana waxa uu yidhi:' **waa qofka wayn ee aan Kari Karin in uu soomo, waa in uu afuraa oo maalin kasta miskiin quudiyaa.)**[35]

Abu hurayrah isna waxa uu yidhi (**qofkii uu haleelo gabow ee soomi kari waaya Ramadaan waxaa dushiisa ah in uu maalin kasta bixiyo hal mud oo cunta ah oo la mida (600g).**

Haweenayda uurka leh iyo ta nuujinaysa:

Hadii ay haweenayda uurka leh nafteeda u baqdo, waxaa u banaan in ay afurto, iyana waxaa la mida haweenayda ilmo nuujinaysaa hadii ay ilmaha u baqdo iyana waxaa u banaan in ay afurto.
Waxaase jirta in ay culimadu dhawr hadal ka yidhaahdeen waxa la gudboon haweenayda uurka leh iyo tan nuujinaysaba, waxayna u qaybsameen sadex qawl:

1. In ay soo qallayso (celiso ayaamihii ay afurtay.
2. In ay soo qallayso(celiso) ayaamihii ay afurtay,maalin kastana miskiin quudiso,
3. In ay quudiso maalin kasta miskiin.
   Sadexdan qawl waxaa ugu saxiixsan ka u danbeeya, oo ah in ay quudiso miskiin maalin kasta oo ay afurtay, sidaas ayayna saxaabadu ku jawaabeen markii la waydiiyay.
   Ibnu cabaas waxaa ka sugnaatay in uu yidhi(**qofka gaboobay, gabadha uurka leh ama nuujinaysaa hadii aysan Karaynin in ay soomaan ama ay baqaan way afurayaan maalin kastana waxa ay quudinayaan miskiin**.)[36]
   Sidoo kale waxa uu arkay Ibnu cabaas haweenay hooyo ah oo uur leh, ama nuujinaysa waxa uu ku yidhi (waxaad **ahay kuwa aan kari Karin soonka dushaada waxaa ahaaday quudin oo qalle lagugu ma laha)**[37]. **Mana jiro cid saxaabada ka mida oo ibnu cabaas ku khilaaftay sida uu ibnu Qudaamah al-maqdasi ku sheegay muqniga (3 /21).**

   Waxaa isna la waydiiyay Cabdulaahi Ibnu cumar Ilaahay raali ha ka ahaadee: **gabadha uurka lihi haday ilmaheeda u baqdo maxaa la gudboon? Waxa uu ku jawaabay 'way afuray waxayna maalin kasta quudinay miskiin oo siinaysaa mud cunta oo la mida (600g).** Waxaa iyana sugan in cabdulaahi ibnu cumar ay haweenaydiisa oo uur lihi waydiisay waxa ay yeelayso? waxa uu ku yidhi' afur oo maalin kasta quudi miskiin hana qallayn.

   FIIRO: Qofka lagu leeyahay in uu soo qalleeyo, ayaamihii ka tegay bisha Ramadaan waajib kuma aha in uu markiiba soo celiyo waayo caa'sha Ilaahay raali ha ka ahaadee waxay tidhi: **waxaan ahaa mid lagu leeyay bishii Ramadaan mana aan Karin in aan qalleeyo ilaa iyo bishii shacbaan**.[38]

[31] Abu Daa'uud (2365) , Axmed(5/376)
[32] Axmed (2/108) , Ibnu Xibaan (2742) , sanad saxiixa min xadiis ibnu cumar
[33] Tirmidi (713) , Baqawi (1763) sanad saxiix ah
[34] Bukhaari (4/161) , Muslim (1115)
[35] Bukhaari (Kitaabul tafsiir / 4505) , Sharxu sunnah (6/316) , Imaam muxadith Maxamed Naasir-udeen Al-baani(calayhi raxmatu laahi wa ridwaan) wuxuu ku sheegay irwaa –il-qaliil (4/22-25)
[36] Abu Daa'uud (2318), Bayhaqi (4/230), Ibnu Jaaruud (381) sanad saxiix ah
[37] Daaraqudni ayaa saxiix ku weriyay (1/207)
[38] Bukhaari ayaa tacliiq ku weriyay (4/189) , waxaa xidhiidhiyay Daraqudni, Cabdirasaaq iyo Ibnu Abi shaybah sanad saxiix ah.

Qofka dhinta iyada oo soom lagu leeyahay:

- Hadii soomkaasi yahay mid nadara waxaa ka soomaya Weligiisa, Rasuulkuna (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). waxa uu yidhi: **qofkii dhinta isaga oo soom lagu leeyahay waxaa ka soomaya waligiisa'**[39].

Waxa kale oo banaan in cid kale ka soomto sida raajaxa ah. Xasan waxa uu yidhi: **hadii ay ka soomaan 30 Qof Maalin qudha soontii waa ka gudaysaa'**.[40]

- Hadii soomkaasi yahay mid lagu leeyahay bisha Ramadaan ka soomi mayo Weligiisu ee waxa uu quudinayaa Miskiin maalin kasta hal mud oo la mid ah **(600grm).**

  Axadiista sheegaysa in laga soomaana waa Caam, sida xadiiska uu ibnu cabaas uu yidhi: Nabiga **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**).** waxaa u yimi **Nin wuxuuna ku yidhi: Rasuulkii Ilaahayow hooyaday baa dhimatay waxaana lagu lahaa bisha Ramadaan ee maka gudaa? Waxa uu ku yidhi 'haa daynta Ilaahay baa u mudan in la gu'do'**.) [41]

  Ibnu Cabaas Ilaahay Raali ha ka ahaadee wuxuu yidhi: **hadii qofku bukoodo Ramadaan dabadeedna dhinto isaga oo aan soomin, waa la quudinayaa ee laguma laha in laga qalleeyo, hadii soomka lagu leeyahay uu yahay soom nadara waxaa ka soomaya weligiisa**.' [42]

  Sidoo kale Camrah ayaa waxa ay ka werisay Caa'sha: in ay ku tidhi **hooyaday baa dhimatay iyadoo lagu leeyahay Ramadaan ee ka qalleeyaa? Waxay ugu jawaabtay MAYA ee maalin kasta ka sadaqayso (hana bixiyo hal mud oo cunto ah.**') [43]

  Markaa sidaas ayaa waa faqsan fahamka toosan, naftuna ay ku xasilaysaa fahamka saxaabaduna ku tusayaa, axaadiistuna ku kulmaysaa.(eeg sifatu soomu Nabiyi (sheekh Saliim ibnu ciid al- hilaali iyo sheekh Cali ibnu Xasan al- Xalabi :safxadda76).

SUXUURTA:

Waxaa iyana sune ah in qofku suxuurto, Rasuulkuna (Salalaahu calayi wa calaa aalihii wasalam) wuxuu yidhi: (Suxuurta, waxaa ku jira suxuurta barakee)[44] Waxaa kale oo ka mida fadligeeda in malaa'iigtuna qofka suxuuranaya u waydiiso ilaahay (subxaana-watacaalaa) danbi dhaaf,naxariis,iyo cafi taana waxaa inoo muujinaya xadiiska uu Abi saciid al-khudri (radiyalaahu canhu) ka warinayo Rasuulka Salalaahu Calayhi Wasalam (Suxuurtu waa cunno barako leh ee ha ka tegina haba ahaatee in midkiin cabo xoogaa biyo ah,Ilaahay malaaigtiisu waxay u ducaysaa kuwa suxuuranaya.)[45]

Xiliga suxuurtu waxaa uu ka mid yahay waqtiyada ducada la ajiibo, ee ilaahay amaanay kuwa danbidhaafka waydiisanaya.

Suxuurtu waxay xoojisaa qofka sooman, waxayna u sahashaa soomidda iyo in uu jeclaysto soomka. Waxaa ku sugan khilaafid la khilaafo yuhuud iyo Nasaaro Rasuulku (salalaahu calayhi wacalaa aalihii wasalam) Wuxuu yidhi :(waxaa kala sooca soomteena iyo ta yuhuuda iyo nasaaro cunnidda suxuurta.).[46]

Waxaa iyana sune ah in suxuuurta dib loo dhigo.Sida uu ka werinayo Anas Ilaahay raali ha ka ahaadee Zayd ibnu saabit waxa uu yidhi: (waxaanu la suxuuranay Nabiga dabadeedna waxaan isu taagnay salaadii waxaan ku idhi imisa ayaa u dhaxaysay eedaanka iyo saxuurta? Waxa uu yidhi in lagu qiyaaso konton aayadood akhrintood.) [47]

Cuntadda lagu suxuurtana waxaa ugu fadli badan timirta.

IFTAARKA (AFURKA)

Sidda sunnada ku cad dhaqankii saxaabaduna ahaa waa in la afuraa marka gabalku dhaco, waana in la dedejiyaa afurka si loo helo wanaaga iyo nimcadda ku jirta ku dayashadda Rasuulka iyo raacidda sunnadiisa, taas baana lagu gaadhayaa liibaanta aakhiro iyo raali ahaanshaha Ilaahay.

Saxaabadu waxay ahaayeen kuwa dedejiya afurka, Camar ibnu maymuun al- awdi wuxuu yidhi: **saxaabada Rasuulku waxay ahaayeen kuwa ugu dhakhso badan afuridda uguna dib dhigid badan suxuurta..[48])**

Afurka oo la dedejiyaa wuxuu keenaa khayr Rasuulkuna Salalaahu Calayhi Wasalam wuxuu yidhi :(**dadku khayr ka suuli maayaan intay dedejinayaan afuradda)[49]** .

Dedejinta afuradu waa sunnadii Rasuulka Salalaahu Calayhi Wasalam wuxuu yidhi: (**umadaydu ka suuli mayso sunadayda hadaanay sugin inay ku afuraan soo baxa xidigaha**) [50]

In la dedejiyo afurku waa khilaaf la khilaafay yuhuud iyo nasaaro: Abu hurayrah ilaahay raali ha ka ahaadee wuxuu yidhi Rasuulku wuxuu yidhi (**diintu ka suuli mayso in ay sarayso inta dadku dedejinayaan afuradda, waayo yuhuud iyo nasaaro ayaa dib u dhiga**) [52] .

[39] Bukhaari (4/168), Muslim (1147)
[40] Bukhaari (mucalaq 4/112))Fatxi(4/1902) waxa xidhiidhiyay Daaraqudni(Kitaabu mudabaj) , Sheekh Maxamed Naasir-udeen Al-baani (calayhi raxmatu-laahi wa ridwaan) sandkiisa wuxuu ku saxiixiyay Mukhtasar saxiixul Bukhaari (1/58).

[41] Bukhaari (4/169) Muslim (1148)
[42] Waxaa soo saaray Abu-Da'ud sanad saxiixa,iyo ibnu Xasam (Al-muxalaa(7/7).
[43] Imaamu Daxaawi baa ku soo saaray mushakil al-athaar (3/142) Ibnu Xasam (al-muxalaa)(7/7) sanad saxiixa,
[44] Bukhaari (4/20), Muslim (1095)
[45] Ibnu Abi shaybah (3/8), Axmed (3/12)
[46] Muslim (1096)

Waxaan iyana si kooban wax uga tilmaami toonaa ictikaafka, Salaadda taraawiixda iyo Sakaatul fidriga.

- **SALAADDA TARAAWIIXDA:**

Salaadda taraawiixda in jamaaco lagu tukado Rasuulka ayay ka sugnaatay, markii uu afar habeen tukaday ayuu markaa ka baqay in asxaabta lagu waajibiyo, wuxuuna ku tukaday gurigiisa. Markii Cumar khilaafada hayay ayaa wuxuu arkay dadkii oo masaajidkii ku tukanaya midmid iyo koox koox, Markaas ayuu Cumar yidhi waxaa ii muuqata oo ila fiican in aan Imaam qudha idiin sameeyo oo uu idin tujiyo, wuxuuna Imaam uga dhigay Ubay ibnu kacab.

In kastoo lagu kala gedisanyahay marka la xadidayo rakcaatka latukanayo taraawiixdda, waxaa cad in hadyiga rasuulku ahaa 8deed rakcadood marka laga reebo witriga. Caa'sha Ilaahay raali ha ka ahaadee waxay tidhi: Nabigu (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**). Kama siyaadin ramdaan iyo iyo xili kaleba 11 rakcadood**[53] **(**waxa weheliya oo ay ku dartay sadexda rak cadood ee witriga)

AL-ICTIKAAF:

Luqad ahaan: waa in la laasimo wax, naftana loo xabiso.

Sharci: ahaana waa in lagu nagaado masjidka si gaara.

Ictikaafku wuu banaan yahay xili kasta oo sanadka ka mida, waayo waxaa sugan in Rasuulku **(**Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**). Ictikaafay tobanka shawaal u danbeeya waxaana u daliila xadiiskii abu Hurayrah .**Waxaase ugu fadli badan 10 maalmood ee u danbeeya Ramadaan waayo Nabigu **(Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam).** (**waxa uu ahaa mid ictikaafa tobanka u danbeeya Ramadaan ilaa iyo ilaahay ka oofsaday**) [54]

Waxaana u shardiya in lagu ictikaafo Masaajidka sida ku cad kitaabka quraanka

(Hana u tegina haweenkiina idinkoo ku negi masaajidda) [Al-baqra (187)]

Waxaana u banaan in marwadu ninkeeda la ictikaafto, ama keligeed waxaana laga qaatay qawlka Caa'sha ee ah: **Nabigu** (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam). **wuxuu ictikaafi jiray 10 danbe Ramadaan ilaa iyo Ilaahay oofsaday, dabadeedna waxaa ictikaafay dabadii haweenkiisii)** [55]

Wax yaalaha u banaan qofka muctakifka ah waxaa ka mida:

- In uu dantiisa u baxo
- In uu maydhasho iy feedhasho madaxa ka saaro masjidka
- In uu masjidka ku waysaysto
- In uu teendho ka samaysto masjidka halka u danbaysa, iyo in uu gogeshiisa dhigtaba.

Iyo in ay haweenaydiisu soo booqato. Iyo in uu sii sogootiyo ilaa albaabka masjidka.

- **Waxaa ka reeban Muctakifka**:

Jimaaca, wax iibinta, baayicidda, ka bixidda masjidka, Raacida Janaasadda, booqashada qofka buka bukana iyo hadalka xun.

- **SAKAATUL FIDRIGA**

Xukun ahaan waa laysku laasimiyay oo waa waajib, sida ku cad hadalka Ibnu-Cumar uu yidhi 'Rasuulku (Salalaahu calayhi wa calaa aalihii wasalam**). waxa uu ku faral yeelay sakaatul fidriga : Adoonkii, xortii, labkii, dhadigii,ilmihii yaraa,iyo qofkii waynaa ee muslimka ahaa.inay bixiyaan hal saac oo cunto ah. Bixiyaana inta ka horaysa intaan loo soo bixin salaadda ciidda**[56].

- **Maxaa la bixinayaa:**

Sida adilada ku cad waa in la bixiyaa Cunto, oo ah saac, qiyaas ahaana la mida (**2.40g**). Oo ah cuntada markaa qaalibka ah.

- **yaa laga bixinayaa:**

Waxaa laga bixinayaa cidii aad adigu quudiso ee aad masruufto sida ku cad xadiiska ibnu Cumar: Rasuulku **wuxuu amray sadaqatul fidiriga ilmihii yaraa, qofkii waynaa,xortii iyo adoonkii la quudinayay .**

- **YAY KU BAXAYSAA:**

Waxaa la siinayaa masaakiinta, sida saxa ah.

- **Meel kale ma loo diri karaa:**

Sida sunada waafaqsan waa in lagu bixiyaa meesha la joogo, hadiise masaakiin qaadata la waayo, waa la diri karaa, balse waa in aanay dhaafin xiligii loogu tala galay, oo ah Salaada ciida ka hor, lana bixiyaa cunto, lana siiyaa dadka ay ku baxayso(masaakiinta).

- **Waqtigeeda:**

Waxay gudmaysaa inta aan salaada loo soo bixin, mana banaana in dib uga dhacdaa salaadda, sidoo kale waxaa laga hor marin karaa laba maalmood intaan la ciidin..

Hadii ay dib uga dhacdo salaadda ciidda waxay noqonaysaa sadaqo ka mida sadaqaatka la bixiyo.

CIIDDA IYO AXKAAMTEEDA:

Ciidu waa maalinta ay Muslimiintu farxadooda ay ku muujinayaan dhamaystirka bisha Ramadaan iyo daacaadkii ay la yimaadeen, waxayna ka mid tahay nimcooyinka Ilaahay ku galadaystay. Waxayna u dareeraan musalaha iyagoo takbiirsanaya:

➢ AXKAAMTA SALAADA CIIDDA[57.]

- Salaada ciidu waa laba rakcadood.
- Todoba takbiirood baa qiraa'ada ka horeeya rakcadda koowaad, rakcadda labaadna shan takbiirood.
- Waxaa sunne ah in lagu tukado banaanka (musalaha).
- Ma leh eedaan iyo iqaamo salaatu jaamicana la odhan mayo.
- Waqtigeedu waa markii ay in waran le'eg cadceedu sare qabato, ilaa laga gaadhayo marka cadceedu kukta ka iilato.
- Sune kama horeeyo, kamana danbeeyo markii musale lagu tukanayo, hadiise masjid ay tahay waa in uu qofku taxiyatul masjid tukadaa.
- Waxaa iyana sugan in rasuulku laba rakcadood ku tukaday gurigiisa markuu musalaha ka soo laabtay.
- Waxaa iyana sune ah in dariiqa marka hore la maro la bedelo marka laga soo noqdo musalaha.
- Ciidul fidriga waa in qofku wax sii cunaa intaanu tegin musalaha.
- Haweenka iyo dumarka xaydka leh iyo hablaha maduxu u daban yahayba waxa sune ah in la soo saaro oo ay musalaha yimaadaan. Laakiin gabadha xaydka leh musalaha geli mayso.
- Hadii Ciidda iyo salad jumce kulmaan, waa in laga oogaa salaadii jimce, masaajidadii jimcaha lagu tukan jiray, laakiin qofkii Ciidda tukaday waxaa u banaan in uu jimcaha iska daayo oo duhur tukaddo.
- iyana waxaa sune ah in lays qurxiyo oo la qaato dhar wanaagsan (mana aha sida dadka qaarkiis u fahmeen inay is qurxintu tahay gadhka oo la xiiro gaaladana laysku ekaysiiyo!!) in laysu tahniyadeeyo iyana dhibi kuma jirto..
-

FIIRO: Haweenku marka ay tegayaan Musalaha uma banaana inay is cadriyaan, balse waa in ay qaataan xijaab iyo jilbaab shuruudihiisi u dhan yahay[58]

Waxaan intaa ku dhaafayaa mawduucan oo aad u balaadhan balse aan ugu tala galay xusuusin, Waxaanan Ilaahay waydiisanayaa in uu inaga yeelo kuwo haleela khayraadka balaadhan ee ku jira bisha ramadaan inagana dhigo kuwo ku bedela nimcadaa mahadnaqa IIaahay sida ka muuqata aayada(**in aad tirada dhamaystirtaan, Ilaahay aad ku waynaysaan hanuuninta uu idin hanuuniyay ,waxaad mudan tihiin in aydin Ilaahay mahadisaan.**) [Al-baqra (185)]

Wasalalaahu wa wabaarik calaa nabiyinaa Muxamedin wa calaa aalihii wasaxbihii waman itabaca alhudaa.

"Qad aba allaahu an yu
tima illaa kitaabahu"
"Ilaahay waa diiday in uu dhamays tiro waxaan kitaabkiisa ahayn"

Sixid, toosin ama Wixii talo iyo tusaale ah ee la xidhiidha qormadan ku soo hagaaji:

E: ahmed_kayse@hotail.com **T: 00252634000388**

Wajazaaka laahu khayran

XUSUUS:

✓ **Qormadan waxaa la dabaacay 1424H (2003CE) waxaan ku sameeyay sixid akhdaa xaga daabacaada ah.**

✓ Waxaa ayaadaha qur'aanka iyo axaadiista Rasuulkaba (salalaahu calayhi wacalaa aalihii waslam) loo qoray macnahooda oo kaliya si aanay u dayacmin (sida in dariiqa lagu tuuro oo kale iwm).

[47] Bukhaar (4/1180), Muslim (1097)
[48] Cabdulrasaaq (7591), waxaa saxiixiyay xaafidka (Fadxul-bari 4/199)
[49] Bukhaari 4/173
[50] Ibnu xibaan (891) sanad saxiixa
[51] Abu Daa'uud (2/305)
[52] Abu Daa'uud (2/306) , Daaruqudni (2/185) sanadkiisuna waa xasan
[53] Faa'iidooyin dheeraada waxaad ka helaysaa Kitaabka [Salaatul-Taraawiix] ee uu leeyahay Sheekh naasirudeen Al-baani (calayhi raxmatu-laahi waridwaan)
[54] Bukhaari (4/226) Muslim (1173).
[55] Bukhaari (4/226). Sh.Maxamed Naasiru-deen Al-baani (raximu laahu tacaalaa), oo xadiiskaa tacliiqinaya wuxuu yidhi: Waase in laga aamin qabaa fidno iyo is dhexgalka raga iyo dumarka, ogolaashana ay ka haysataa waligeeda.

[56] Mutafiq calayhi (bukhaari iyo Muslim)

[57] Faa'iidooyin dheeraada oo ku saabsan axkaamta ciidda waxaad ka helaysaa: [salaatul ciid fil musalaa hiya sunah] sheikh Naasirul-diin al-baani, [axkaamul ciidayn] sheikh cali ibnu xasan al- xalabi,[tanwiirul caynayn fil axkaamil adaaxi wal-ciidayn] – sheikh Abu xasan al-ma'ribi)
[58] Faa'iidooyin aad u qiimo badan oo la xidhiidha jilbaabka waxaad ka helaysaa kitaabka aadka u qiimaha badan ee uu qoray Al-imaam Muxadith Maxamed Naasiru-diin al-Albaani ee la yidhaahdo [Jilbaab mar'atu muslima].